# Seygii Saaqidka Ahaa! (Qeybtii 5-aad)

**W.Q. Cabdicasiis Maxamad Shidane**

**Ogost 22, 2016**

---

Markii la soo gaaray xilligii aan safarka ugu ambabixi lahaa dalka Suudaan, waxaa ila soo daristay baqdin iyo walbahaar horleh. Baabuurka na qaadayaa wuxuu baxayaa saq dhaxe. Waxaa nalagu aruuriyay guri mugdi ah, waana meesha aan ka soo dhaqaajinnay. Waxaan ka koobneyn toddobo iyo tobban qof. Shan dumara iyo tobban iyo labo rag ah, oo ay ku jiraan seddax nin oo ah kuwii na tahriibinayay. Baabuurka aan raacnay ma ahayn mid ku filan in uu dadkaas oo dhan wada qaado haseyeeshee qasab iyo jajuub ayaa nalagu saaray. Ciriiriga, kulka iyo shiirka ka soo burqanaya dadka baabuurka saaran wuxuu i xasuusiyay rafaadka iyo dhibka tirada badan ee nagu soo fool leh.




Markii ay nala wareegeen kooxaha wax tahriibiya, ayaa noogu danbaysay qubeys iyo nolal nafis leh. Xawaaraha uu ku socdo baabuurkuna waxay caddeyn u tahay halista aan dhex dabbaalanayno iyo Malakul-mawdka aan la fara ka ciyaareyno. Haa, waa halis weyn oo noo wada muuqatay, haddana in aan wajahno halistaas waan ku qasbannahay. Qof walba daruuf hooy iyo harsad u diidday ayaa luqunta ugu jirta. Waana midda nagu riixaysa in aan galno safar saxariir iyo surmi badan oo aannaan hubin waxa uu xaalkayagu ku dambayn doono.

Mar aan sii soconno ku dhawaaw habeen iyo maalin, ayaa baabuurkii cillad yar oo xagga matoorka ah haleeshay. Waxay dantu nagu kalliftay in aan ka degno baabuurka, si loo sameeyo. Hurdo ayaan la wada dhacnay, daalka iyo rafaadka na haya awgiis. Qof walba adkaysiga iyo tabarta Eebbe ugu deeqay ayuu maalayay. Waxaa dhacay wixi aan ka cabsi qabay, tan iyo markii uu safarkani igu dhashay. Waxaan ku soo baraarugay qaylada qof dumar ah. Mid ka mid ah kuwii tahriibinta u xilsaarnaay, ayaa wuxuu qasab ku kaxeystay mid ka mid ah gabdhihii aan wada soconnay, si uu u kufsado. Gabadhii qayladhaan ayay ku dhufatay, balse, waxaa loogu baddelay dharbaaxsho iyo in bistoolad madaxa looga garaacay. Afarteennii kale waxaan isku darnay baroor iyo booyin. Gabadha meel dhawr mitir noo jirta ayuu ku kufsanayay ninku, halkaas ayey ba'ayeyda iyo hoogayga is ku dartay. Gabadh i ag


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

fadhisay waaba ay suuxday, argagax ay ka qaadday sida wax u dhacayaan awgiis. Wiilashii nala socdayna waa wada aamusan yihiin, oo mid far nuuxin kara kuma jiro. Qof kasta naftiisa iyo lafihiisa ayuu u baqanayay. Dhawr iyo labaatan daqiiqo ka dib, waxaa igu soo ag dhacday gabadhii oo anfariir iyo argagax ka muuqdo, oo aan miyirba lahayn. Qaarka danbe ee jidhkeeda ma qaadi karin, dhiig fara badanna uu ka da'ayo cajidhadeeda.Taaheeda uun ayaan maqlayay.

Waxaa jidhkayga dhammaan saaqday cabsi iyo jidhidhico. Garaaca wadnahayga waxaad moodaysay in durbaan laga dhex tumayo, taas oo aan islahaa dadkoo dhan ayaaba maqlaya. Waxaan isweydiinayay "taloow gabadhee ku xigi doonta?!". Aniga mise…? Waxaan toos u maqlayay wada hadalka dhex marayay midka wax kufsaday iyo labadii kale ee saaxiibbadiis ahaa. Wuu ku faraxsanaa falka bahalnimada ah ee uu ku kacay. Af Carabi ayey ku wada hadlayeen. Waxaan qiyaasayay in ay Suudaan yihiin, balse, ma hubo haybtooda dhabta. Hurdo waan kala caagnay, waxaanan galay fikir. Fikir aan kala go’o lahayn. Waxaan dib u mar kale u xasuustay Seygaygii Saaqidka ahaa iyo dhaqan xumidii uu igula kici jiray. Kufsigii sharciyaysnaa iyo dhibkii aan garawshiiyaha lahayn! Waa muuqaallo aan maskadayda marnaba ka go’i karin. Sidaas ayuu waagii noogu baryay, waxayna noo sheegeen in berri la baxayo, qofkii hadal laga maqlana la dilayo. Inta ay hadalkaas noo sheegayeen, ulayn iyo harraati ayay ku wadeen dhallinyaradii nala saarneyd baabuurka. Cuntadu waa gabaabsi, biyuhuna waa sii yaraanayaan.Waxaan se niyadda ku dhisaneynay in aan gali rabno Suudaan, gaar ahaan meesha hadda loo yaqaan "Suudaanta Koonfureed".
Waa waddan dagaallo sokeeye halakeeyeen oo dadka oo dhammi hubaysan yihiin, wax walbana laga filan karo. Markii aan u soo dhawaannay magaalada Juba, oo ah caasimadda Suudaanta Koonfureed, ayay nagu amreen in aan ka wada degno baabuurka. Qaarkeen qoorqabad ayaaba loo ga soo dajiyey baabuurka.Waxay nagu wargaliyeen in aan ku lugayno waddo yar oo noo muuqatay, taas oo na geynaysa magaalo markaas aan sheedda ka arkaynay. Iyagu ma doonayaan in la arko, maxaa yeelay, waa shabakad ka shaqeysata tahriibinta dadka iyo ka ganacsiga daroogada.

Waxaan soo lugaynay soddon daqiiqo kudhawaad, si aan u soo gacadhiganno magaalada Juba. Qaarkeen ma socon karaan. Waxaa ugu liidatay gabadhii la kufsaday, oo wajiga daboolanaysa, nolashana kahatay, balse, mar walba waan dhiirragalinayay anigu, oo waxaan kula talinayay in aysan nolasha ka quusan, waxa nafteedu faraysana aysan samaynin. Waxay u muuqatay qof nolosha nacday in ay isdisho ayayna damacsan tahay, oo waxey ku barooraneysay "Ilaahow meel uun i geey, aan naftaan is dhaafsiiyee". Taas oo ay u sababtahay kufsigii lagu la kacay laakiin iyadu dambi ma leh haseyeeshee sumcadxumada iyo sharaf darrda ay bulshdeennu ka aaminsanyihiin gabdhaha falaka noocan ah lagula kaco ayaa ku kalifaya in ay nolosha is dhaafiso. Magaaladii ayaan soo galnay, annaga oo meel aan wax ka billaawno garaneyn. Wiilashii Soomaaliyeed ee na la socday, mid kasta wuxuu raadsaday qofkii uu ka yaqaannay magaalada. Halkii ayey noo ga kala dareereen. Shanteennii gabdhood midba midda kale ayey eegaysaa, oo ma garaneyno jid iyo jaho aan qabanno.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Waxaan iska fadhiisannay geed hoostiisa. Aad ayaan u baahannahay. Qubeys iyo dhaqdhaqasho guudna ma heysanno. Dhawr saacad ka dib, oo aan la'nahay qof aan la hadalno, ayaa waxaan ku dhiirraday in aan salaamo wiil aan is iri waa Soomaali, ama waa Itoobiyaan. Af Carabi yar oo ii billaawnaay ayaan ku salaamay, durbadiiba wuu nagu soo leexday wiilkii. Runtii waan ku faraxnay in ugu yaraan aan helnay qof na la hadla. Wuxuu noqday wiil Soomaaliyeed. Waxaan u sheegnay xaaladdeenna guud, dhibka aan ku sugannahay, iyo in gabadh naga mid ah xanuunsan tahay. Wuxuu billaabay in uu waco dhallinyaro kale, si ay gurmad noogu fidiyaan. Waxaan dareemay in aanay Soomaalinimadu wali dhiman si kastoo waddanka gudihiisa la isku nacay, qabyaaladna dadka kala dishay.Wax yar ka dib, waxaa noo yimid koox dhallinyara ah. Waxey go'aamiyeen in nala kala qaybiyo, waayo ma suurtagalayso in aan shanteennuba hal meel wada degno.

Labo is ku meel in la dajiyo, seddaxna isku meel. Guryaha aan dageyno waa guryo dhallinyaro u kiraysan. Qaarkood waxey noo ga baxeen qolalkoodii. Waxey noo keeneen wixii agab ahaa ee aan u baahneyn. Nasasho ka dib, gabadhii la kulantay kufsiga waxey qaadday cuqdad nafsi iyo ciil nolasheeda galaafan raba. Aniga ayey qolka ila deggan tahay. Celcelinteeda iyo xannaaneynteeda ayaaba hawl adduunyo ah. Dhallinyarada aan la deggannahay waxay la yaabban yihiin waxa gabadha ku dhacay, iyo xanuunka haya. Qaarkood waxay mala-awaalayaan in Jin iyo il-insi ku jiraan gabadha, aniguna ma oran karo waa la kufsaday, oo taasi dhaqan ahaan gabadha waxey ku noqoneysaa fadeexad iyo sumacd xumo saameyn karta aayatiinkeeda. Gabadhaan dhibban waxay sii labajibbaartay dhibkii aniga i haystay. Qudheedu waxay dalkii uga soo carartay guur qasab ah oo lal damacsanaay, balse, waan ka qiso iyo duruuf duwanahay anigu, meelo badan aanba is kaga ekaannee. Toddobaad ka dib, waxaan billaabay in aan dadka wareysto, si aan u ogaado habka loo gu noolaan karo magaalada Juba. Waa magaalo burbursan, wax adeeg ah kama jiro, kaliya ganacsato iyo dad maalgashi u yimid mooyee.

Dhib iyo culeys ayey igu noqotay in aan caawiyo gabadhaan is ku dhex yaacday. Qoyskeeda meel aan kala xariirana ma aqaan. Waxaan ka fursan waayay in aan qabiilkeeda weydiiyo, si loo helo qof ay isku beel yihiin, kuna xiri kara ehelladeedii, maxaa yeelay heer waxey gaartay ay miir iyo garaadba beesho. Nasiib darro, waa la waayay qof ku beel ah, xanuunkeedana qof xammili kara nagu ma jiro, oo qof kasta tiisii ayaa cuslaysay. Anigu waxaan dhibka iyo xanuunka is ku dhaafinayay adeegga guriga aan markaas ku noolnahay, cunta karinta, iyo in aan dharka u dhaqo dhallinyarada xamaaliga u joogta magaalada, wixii ay ii gartaanna aan ka qaato, sidaas na aan ku dabbaro nolasheyda. Run ahaantii, ma jirin shaqo toos ah iyo wax dhigaalsi la sheego laga sameyn karo.

Si walbaba, waxaan iga go'neyd in aan halkaas ka sii dhaqaajiyo, balse, sahaydu waa igu yareyd. Muddo bil ah ayaan dhar dhaqoow iyo adegga guriga hayey, gabadhii xanuunsaneydna waxaa loo geeyay cid kale oo kafaaala qaadday xannaaneynteeda. Siduu xaal sidaas u ahaa, ayaa wiilashii aan booyaasada u noqday waxey ii qoondeeyeen lacag yar, taas oo ka dhigan in aan wixii aan u baahdo ku iibsado, aniguna aan dharka iyo cuntada u qaabilsanaado. Wiilashi aad ayey ii qaddarin jireen,


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

oo waliba waxey i tuseen in ey jiraa rag Soomaaliyeed oo xil kas ah, haba yaraadaane. Ma aaminsaneyn in eyba jiraan rag dhaqankaas suubban leh, sidaas in aan aaminana waxaa ii gu wacan suuraddii aan ka qaatay ragga, ka dib mashaqadii aan kala kulmay qofkii aan nolasha in aan wadaagno ku hishiinnay.

Lixdan maalmood ka dib, waxaan go'aansaday in aan iskaga tago magaalada Juba, oo aan qabto xaggaa iyo Kharduum, maxaa yeelay, wax isbaddel nolaleed ah kuma hayo Juba, qorshahaan u socdayna sidaas iyo si u dhaw ma aheyn. Sad nolaleed suubban uga ma jeedo Suudaan. Waana dal soo dhaweynta ku wacan, sida aan ka arkay, balse, aniga joogis ii ma lahan. Dhallinyaradii aan u adeegayay waxay igu la taliyeen in aan iska joogo Juba, oo waliba ay qarashka aan ugu shaqeeyo ii kordhinayaan, laakiin, qalbigeygu kuma qanacsaneyn qawlkooda. Waxaan talo ku gaarnay aniga iyo labo ka mid ah gabdhihii aan safarka soo wada galnay, in aan geeddigeenna sii wadanno. Waa geeddi aan la garaneyn meel uu ku hakan doono. Baadigoob nolaleed oo fil-daran ayaa nagu wada jira, qof walbana qiso gaara ayaa arligii ka soo kaxeysay. Waxaa naga dhaxeeya gabdhahaan waa iskaashi iyo isxulufeysi gaashaandhig, oo aan la galayno nolasheenna.

Is abaabbul iyo tabaabushaysi ka dib, waxaa na lagu soo daray koox kale oo iyaguna ka shaqeysa tahriibinta dadka, gaar ahaan, kuwa aan sharciga laheyn. Waa dhallinyaro is kugu jirta Suudaan iyo Soomaali. Waa shabakad wax kasta u sameynaysa sidii ey shilimaad ku heli lahaayeen. Sharaf iyo damiir ma dhawraan. Qof ahaan magaalada aan u socdo cidi ii ga ma horreyso. Waa in aan u babac-dhigaa wax alla iyo wixii igala soo gudboonaada halgankaan, hodid iyo hagidba. Ragga qaar wey ila yaabaan, kolkaan u sheego in aan karti u leeyahay wixii ila soo gudboonaada, oo aan kala kulmo waddada aan ku gaarayo hamiga iyo yoolka ii degsan. Safarkii ayaan soo galay, aniga oo wax cabsi ah ka qabin waxa dhici doona. Waxaan iska dhaadhiciyay in dhibkii aan soo arkay mid ka xunuun weyn uusan ii dhimmanaeyn. Safarkani wuu ka dheer yahay kii Kenya aan uga soo baxnay, oo dhawr magaalo ayaa la sii dhex marayaa. Waxa qura ee uu ku fiicnaay safarkani waa in adeegyada qaar aan ka helaynay magaalo kasta oo aan soo caga dhiganno.

Shan maalin ka dib, waxaan soo galnay magaalada Kharduum ee ah caasimadda dalka Suudaan. Waxaan ku soo galnay sifo sharci-darra ah. Waxay na geeyeen maaqayad ay ku shaahaan Soomaalida ku nool Kharduum. Sida shinni fiyoore aragtay ayey noo gu soo xoomeen. Waxa iga yaabiyay ayaa waxey aheyd in nalagu billaabay wareysi iyo weydiin la xariirta beelaheenna. Taas oo na shaki galisay. "Qabiilkee tahay, iyo ma lagu qabaa?!" waxey ahaayeen labada weydiin ee ey nagu soo dhaweeyeen ehelkii iyo xigaaladii Soomaaliyeed ee aan meesha ugu tagnay..Dabcan, waxaan dareemay in meeshaan fikirka qabaliga ahi ku xoog badan yahay. Malaha meelba meesha Soomaalidu kaga badantahay ayay qabyaaladduna ku badantahay.Waxaa na la geeyay guri qolol badan, oo ay ku noolyihiin hablo da' kasta is kugu jira, duruufo kala gaddisanna ay meesha keentay. Qol aad u yar oo ay horay u degnaayeen laba gabdhood ayaan wax ka degnay. Waa waji cusub iyo nolal ka duwan tii aan ku soo kala qaatay Kenya iyo Suudaanta Koonfureed.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Sida caadada ii ahaydba, meel is kama fadhiisan, mana israacin nolasha aan ku arkay Kharduum, taas oo hablaha jooga eay ku mashquulsanaayeen xodxodashada barbaarta meelaha taagtaaggan, cabidda Shiishadda, iyo ku haasaaweynta aaladda Interneydka. Waxaan billaabay in aan xooraamin iyo xeyladeysi sameeyo, si aan u helo wax shaqo ah oo aan sharftayda qofnimo ku difaacdo. Inta aan shaqa raadiska ku jiray, waxaan kala kulmay Ragga Suudaaniyiinta ah iyo kuwa Soomaalida ah dabacsanaan ay ku dheehan tahay damac rageed oo qaab daran. Waa run in ay iyaga la yaab ku tahay gabadh shaqo rabta, balse, aan dadnimadeeda shilimaad siisaneyn.

Labadii gabdhood ee ila soo galay Kharduum, waxey la qabsadeen jawigii meesha ka jiray, ee xarrakada iyo xoola raadinta qaabka daran ku dhisnaay. Dabci ahaan waan kala gaddisaneyn, walow aan meel ku wada nooleyn. Inta badan ma xiiseyn jirin dhaldhalaalka guud ee gabdhaha qaar maanta is ku hawlaan. Shaqo in aan ka helo Kharduum waa ay yara adkaataay, maxaa yeelay, gorgortanka ragga qaar rabaan ma ahayn mid la sameyn karo. Waana dhaqanka aan ifka ugu nacebahay. Kabiya-diididdaasi waxey kalliftay in aan dhawr bilood shaqo la'aan ku sugnaado.

La soco qaybta 6aad

W.Q. Cabdicasiis Maxamad Shidane
Email: shidane05@hotmail.com

-----

**Sidoo kale akhri**

Qaybtii 1aad
Qaybtii 2aad
Qaybtii 3xaad
Qabytii 4 aad


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved